

INA SAWAAR

Tixdan gaabani waxay ka hadlaysaa socod cusub oo hablaha qaar hadda la dhacsan yihiin kuna qanacsanyihiin aniguse aan saluugay, oo u arkay dhaqanka hufan ee hablaha soomaalida inuu siweyn wax ugu dhimayo, Waxaan u qaatay in aw tuf lihi ku habaaray meel muuqata ha gaarina uuna la helay.

Waxaan halkan si xushmad leh ugu hambalyaynayaa nin Boosaaso jooga laakiin reer Eyl ah oo magaciisa aanan shaacinayn arrimo amnigiisa la xiriira awgeed oo la ii sheegay toddoba gabdhood oo noocaas seetaysan ah intuu arkay inuu bakooraadeeyey ayna ka carari weeyeen deetana iska dul daateen hablihii..... Waa xil cid kasta saaran in loo hiiliyo dhaqanka suuban ee soomaalida wixii kusoo kordha ee wax u dhimayana si wadajira looga hortago marka xil gudashiisaas ayaan ugu hambalyaynayaa ee maaha nacayb gaar ah oo anigu hablahaasi aan u qabo darteed inaan ugu hambalyeeyey.

Socodka hablahaani waxay isoo xasuusiyeen rati aanu lahaan jirney oo ina sawaar la oran jirey oo mar kasta suulasha loo kala duwi jirey (Suulal kala duwidu waa nooc ka mid ah hababka awrta loo dabro kaasoo ratigu maanta dhan haddii uu socdo guriga aanu ka librayn), marka si weyn ayay u shabbahaan oo maanta hadday sii socdaan kaama librayaan.

1. Sida Awrkayagi ina sawaar dumarkan seetaysan
2. Ee wada saraawiisha xiran sare u dhuudhuuban
3. Een socodka meelay arkaan saacadaha Gaarin
4. Xubnihii jirkoo wada sawiran suuq u bixitaankan
5. Hadba sin u dhaqaaq sinniqsigaan sababta loo keenay
6. Inta siinka gabay tirisa iyo seyn cad odayaalka
7. Waa su'aal hortaal oo jawaab laga sugayaaye
8. Siday aniga ila tahay haddii yarehe aan saafu
9. Socodkii habluhu inay badsheen dabarna loo soohay
10. In sinqaawintii laga tegey oo loo beddeley saatan
11. Silloonaan samaan loo filiyoo dhaqanki oo suulay
12. Sanaatiikh dhaqaale iyo nidaam gaalo socodsiisey
13. Socodkaan in laga soo dalbaday suuqyada adduunka
14. Subax dhaaf gudniinoo safmara inaynu soo saarnay
15. Sebenkiyo waqtigan socod la fila loona sacabbeeyey
16. Sidan inay xukuumadda la tahay sax iyo fiicnaantu
17. Inay saxan yihiin oon anigu khalad saluugaayo
18. Si kaleeto inay wax u jiraan aanse sixi waayey
19. Inaan waalidkii seejin Karin say rabaan ubadku
20. Siyaabahaas midka tahay dhab yaa iila kala saara?

MMX- Gaani, April, 2005
Tel: 2525755782/2525441743
Email: mmhgani@yahoo.com

